

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# COVERME.GOV – CEYMIS CAAFIMAAD AAD AWOODO KARTAAN OO LOOGU TALO GALAY DADKA KU NOOL MAINE

*Keydso lacag iyo waqtiga aad ku raadsan lageyd caafimaad adiga oo ka codsada CoverME.gov.*

Waxaa la gaaray xiliga is Diiwaan Gelinta furan ee 2023 ee ceymiska caafimaadka! Is diiwaan gelinta furan waxa ay CoverME.gov ka bilaabaneysaa 1da Nofeembar 2022 kuna eg tahay 15 Janaayo, 2023. Iyada oo leh doorasho kala duwan iyo habab kala duwan oo dhaqaale lagu keydsan karo si aan waligeed horay u dhicin, CoverME.gov waa halka dadka ku nool Maine ceymis caafimaad oo ku haboon qoysaskooda. Sanadkii la soo dhaafay 80% dadka heysta ceymiskan caafimaadkan ay ka heleeen CoverME.org gargaar maaliyadeed oo la xiriira ceymiska caafimaadka. Sanadkan waxa aad ka heleysaan fursad aad dhaqaale ku keydsataan, sidaa darteed waa muhim in aad codsataan gargaarka maaliyadeed, xitaa haddii aadan shuruudaha ka soo bixin sanadkii la soo dhaafay.

## CODSASHADA COVERME.GOV, WAXA AAD KA HELEYSAAN CEYMIS CAAFIMAAD OO LEH

- *Lacag yar oo aad bixineysaan bil kasta ilaa dhawr doolar bishiiba*
- *Lacag yar oo aad jeebkiina ka bixineysaan*
- *Ceymis tayo sare leh, ceymis guud oo aad qoyskaaga u hesho gaar ahaan cudurada khatarta ah iyo shilalka*
- *Ceymis caafimaad oo aan diideyn ama ama aan lacag dheeraad ah kaaga qaadeyn xaaladaha caafimaadka ee horay u jiray*

**Ka codso maanta CoverME.gov!**

## CAAWINAAD LACAG LA'AAN AH WAXA AAD KA HELI KARTAAN XAFIISYADA IS DIIWAAN GELINTA SI AAD U CODSATO

Soo booqo: **coverME.gov/localhelp**

Soo wac: **(866) 636-0355**; TTY 711. Luqadaha aan aheyn afka Ingiriisiga, dooro 4.



coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# KUMA LIHID CEYMISKA CAAFIMAADKA GOOBTA SHAQADA? COVERME.GOV AYAA KU CAAWINEYSA

*Ceymiska caafimaadku  waa muhim si qoyskaagu u badbaado – jir ahaan iyo dhaqaale ahaan. CoverME.gov waxa ay dadka Maine ku nool ke heli karaan ceymiska cafimaadka oo tayo sare leh oo ay awoodi karaan.*

Waxaa la gaaray xiliga is Diiwaan Gelinta furan ee 2023 ee ceymiska caafimaadka! Is diiwaan gelinta waxa ay CoverME.gov ka bilaabaneysaa 1da Nofeembar 2022 kuna eg tahay 15 Janaayo, 2023. Iyada oo leh doorasho kala duwan iyo habab kala duwan oo dhaqaale lagu keydsan karo si aan waligeed horay u dhicin, CoverME.gov waa halka dadka ku nool Maine ceymis caafimaad oo ku haboon qoysaskooda. Sanadkii la soo dhaafay 80% dadka heysta ceymiskan caafimaadkan ay ka heleeen CoverME.org gargaar maaliyadeed oo la xiriira ceymiska caafimaadka. Sanadkan waxa aad ka heleysaan fursad aad dhaqaale ku keydsataan, sidaa darteed waa muhim in aad codsataan gargaarka maaliyadeed, xitaa haddii aadan shuruudaha ka soo bixin sanadkii la soo dhaafay.

## CODSASHADA COVERME.GOV, WAXA AAD KA HELEYSAAN CEYMIS CAAFIMAAD OO LEH

+ *Lacag yar oo aad bixineysaan bil kasta ilaa dhawr doolar bishiiba*
+ *Lacag yar oo aad jeebkiina ka bixineysaan*
+ *Ceymis tayo sare leh, ceymis guud oo aad qoyskaaga u hesho gaar ahaan cudurada khatarta ah iyo shilalka*
+ *Ceymis caafimaad oo aan diideyn ama ama aan lacag dheeraad ah kaaga qaadeyn xaaladaha caafimaadka ee horay u jiray*

**Ka codso maanta CoverME.gov!**

## CAAWINAAD LACAG LA'AAN AH WAXA AAD KA HELI KARTAAN XAFIISYADA IS DIIWAAN GELINTA SI AAD U CODSATO

Soo booqo: **coverME.gov/localhelp**

Soo wac: **(866) 636-0355**; TTY 711. Luqadaha aan aheyn afka Ingiriisiga, dooro 4.

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# COVERME.GOV IYO DADKA KU CUSUB MAINE



*Keydso lacag kharashka caafimaadka ee CoverME.gov — Suuqa Ganacsiga Caafimaadka ee Maine.*

Waxaa la gaaray xiligii is diiwaan gelinta caafimaadka.  Xilliga is diiwaan gelinta waa inta u dhaxeysa 1da Nofeembar ilaa 15 Janaayo. Sanadkan, gargaarka dhaqaale ee ceymiska caafimaadka ayaad heli kartaa si uu u noqdo mid aad awoodi karto – dad fara badan ka qeyb qaata – ka badan intii horay uga qeyb qaadan jirtay.

CoverME.gov, waxa aad is barbar dhigi kartaa ceymiska caafimaadka, ka codsan kartaa gargaarka maaliyadeed, oo lagaa caawiyo is diiwaan gelinta ceymiska caafimaadka ee ku haboon baahidaada iyo miisaaniyadaada.

**Lacag la'aan ah, gargaar degaanka ahayaad heli kartaan** oo luqadaha kala duwan ah oo aad ku codsan karto gargaar dhaqaale oo aad isaga bixiso ceymiska caafimaadka. **Soo wac: (866) 636-0355;** TTY 711. Luqadaha aan aheyn afka Ingiriisga, dooro 4.

## SHARCIGA WADANKA AAD KU JOOGTO IYO COVERME.GOV

- ***Codsiga aad codsato saameyn kuma yeelanayo sharciga aad waddanka ku joogto, adiga iyo qoyskaaga.***
- *Waajib ma aha in qofka cosanaya heysta dhalashada Mareykanka si ay isu diiwaan geliyo ceymiska caafimaadka ee  suuqa furan (QHP). Qaxootiga waddanka si sharci ah ku deggan waddanka oo ka soo baxa shuruudaha aasaasiga ah ayaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan ceymiska caafimaadka ee suuqa furan.*
- *Dadka codsanaya waxaa kale oo laga yaabaa in ay ka soo baxaan shuruudaha gargaarka maaliyadeed ee suuqa furan, iyo shuruudaha dheeraadka ah ee ku xiran, oo ay ka mid yihiin  dakhliga qoyska soo gala iyo tirada qoyska.*
- *Cadeynta dhalashada ama sharciga uu waddanka ku joogo waa muhim u ah oo kaliya ee dadka codsanaya ceymiska caafimaadka, ee ma aha xubnaha kale ee qoyska.*
- *Macluumaadka ay soo gudbiyaan dadka codsanaya lalama wadaagi doono hay'adaha dawladda ee fuliya sharciyada dhalashada iyo socdaalka ama booliska.*

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# KU BILOOW SANADKA CUSUB CEYMISKA CAAFIMAADKA.




coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH
COVERAGE FOR MAINE
CODSO CAAWINAAD AH IN
CEYMISKA
CAAFIMAADKA
LAGAA BIXIYO.


coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH
COVERAGE FOR MAINE
BOOQASHADA DHAKHTARKA
CEYMISKA
CAAFIMAADKA
AYAA BIXINAYA.

coverME.gov
AFFORDABLE HEALTH COVERAGE FOR MAINE

# SANADKA CUSUB, SHARCIYO CUSUB

CEYMISKA CAAFIMAADKA 2023 WAA MID QOF KASTA AWOODI KARO.

